coverME.gov

AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# CAYMISKA CAAFIMAADKA AYAA NOQDAY IN LOO AWOODI KARO SI KA FIICAN SIDII HORE

*Lacag ka keydso kharashka daryeelka caafimaadkaaga barta CoverME.gov – Caymiska caafimaadka cusub ee Maine ee Marketplace oo ay bixinayso Maine looguna talagalay Maine.*

Isqoritaanka furan ee loogu talagalay caynsanaanta caafimaadka 2022 ayaa hadda jirta oo ka fiican kuwii waayadii hore. Waqtiga isqoritaanku waa inta u dhexaysa Noofambar 1, 2021 iyo Janawari 15, 2022. Sannadkan, waxa jirta ka caawin dhaqaale la kordhiyay si caynsanaanta looga dhigo mid si ka sii badan loo awoodi karo – looguna talagalay dad ka sii badan – ka sii badan waligeed. In ka badan 80% reer Maine ee ka iibsanaya CoverME.gov ayaa u qalma caawimo maaliyadeed si ay u dhimaan biximaha bishii kasta ah. Xitaa haddii ma hore aadan u qalmin, waa waqtigii aad mar labaad aad isku dayi lahayd.

Markaad joogto CoverME.gov, waxaad is barbardhigi kartaa fursadaha qorshaha, aadna codsan kartaa kaalmo dhaqaale, oo waxaad heli kartaa ka caawimo isqoritaan qorshe deeqa baahiyahaaga iyo miisaaniyaddaada.

## WAXAAD KA HELI KARTAA QORSHE CAAFIMAAD LEH

+ *Lacagta bisha la bixiyo oo noqon karta lacag aan bishii sidaa u badnayn*
+ *Kharashaadka u qofku jeebka ka bixiyo oo hooseeya*
+ *Tayo, caynsanaan dhammaystiran oo ku caymin doona haddii aad shil ama jirro wayni kugu dhacdo.*
+ *Caynsanaan aan ku diidin karin ama aan lacag ka sii badan kuugu soo dallacin xaalado caafimaad hore u sii jiray awgeed*

### Maantaba iska diiwaangali CoverME.gov!

Isqoritaanka loogu talagalay 2022 ayaa hadda furan.

KA HEL CAAWIMO LACAG LA'AAN AH KHUBARADA QORITAANKA CAYMISKA EE DEEGAANKA SI AAD U CODSATO.

Booqo: **coverME.gov/localhelp.** Wac: **(866) 636-0355**; TTY 711. Luqadaha kale ee aan Ingiriisiga ahayn, dooro xulashada 4.



coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# CAYMISKA CAAFIMAADKA AYAA NOQDAY IN LOO AWOODI KARO SI KA FIICAN SIDII HORE

*Lacag ka keydso kharashka daryeelka caafimaadkaaga barta CoverME.gov – Caymiska caafimaadka cusub ee Maine ee Marketplace oo ay bixinayso Maine looguna talagalay Maine.*

Isqoritaanka furan ee loogu talagalay caynsanaanta caafimaadka 2022 ayaa hadda jirta oo ka fiican kuwii waayadii hore. Waqtiga isqoritaanku waa inta u dhexaysa Noofambar 1, 2021 iyo Janawari 15, 2022. Sannadkan, waxa jirta ka caawin dhaqaale la kordhiyay si caynsanaanta looga dhigo mid si ka sii badan loo awoodi karo – looguna talagalay dad ka sii badan – ka sii badan waligeed. In ka badan 80% reer Maine ee ka iibsanaya CoverME.gov ayaa u qalma caawimo maaliyadeed si ay u dhimaan biximaha bishii kasta ah. Xitaa haddii ma hore aadan u qalmin, waa waqtigii aad mar labaad aad isku dayi lahayd.

Markaad joogto CoverME.gov, waxaad is barbardhigi kartaa fursadaha qorshaha, aadna codsan kartaa kaalmo dhaqaale, oo waxaad heli kartaa ka caawimo isqoritaan qorshe deeqa baahiyahaaga iyo miisaaniyaddaada.

## WAXAAD KA HELI KARTAA QORSHE CAAFIMAAD LEH

- *+Lacagta bisha la bixiyo oo noqon karta lacag aan bishii sidaa u badnayn*
- *+Kharashaadka u qofku jeebka ka bixiyo oo hooseeya*
- *+Tayo, caynsanaan dhammaystiran oo ku caymin doona haddii aad shil ama jirro wayni kugu dhacdo.*
- *+Caynsanaan aan ku diidin karin ama aan lacag ka sii badan kuugu soo dallacin xaalado caafimaad hore u sii jiray awgeed*

**Maantaba iska diiwaangali CoverME.gov!**

**KA HEL CAAWIMO LACAG LA'AAN AH KHUBARADA QORITAANKA CAYMISKA EE DEEGAANKA SI AAD U CODSATO.**

Booqo: **coverME.gov/localhelp.** Wac: **(866) 636-0355**; TTY 711. Luqadaha kale ee aan Ingiriisiga ahayn, dooro xulashada 4.

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE



# COVERME.GOV IYO KUWA MAINE KU CUSUB

*Lacag ku dhowro kharashaadkaaga daryeelka caafimaadka CoverME.gov — Maine's cusub ee Caymiska Caafimaadka ee Marketplace oo ay Maine ay u samaysay, ee reer Maine.*

Diiwaangelinta furan ee caymiska caafimaadka ee 2022 wakhtigooda waa la joogaa oo sidoo hore wuu ka fiican yahay. Wakhtiga isdiiwaangelinta waa inta u dhaxaysa 1da Noofembar, 2022 iyo 15ka Janaayo, 2023. Sannadkan, waxaa la kordhiyay caawinaada dhaqaale oo loo diyaariyay si caymiska looga dhigo mid la awoodi karo - oona loogu talagalay dad badan - si ka duwan sidii hore.

Bogga CoverME.gov, waxaad is barbardhigi kartaa xulashooyinka qorshaha caymiska, waxaad codsan kartaa kaalmo dhaqaale, oo waxaad heli kartaa caawimo isdiiwaangelinta qorshe caymis caafimaad oo ku habboon baahiyahaaga iyo miisaaniyaddaada.

**Sidoo kale waxa la helaa caafimaad maalli oo bilaash ah,** oo luqado badan si aad u codsato kaalmo dhaqaale oo aad isaga bixiso caymiska caafimaadka. **Wac: (866) 636-0355;** Qatka Dadka Maqalka ku Adag TTY 711 Luuqadaha aan Ingiriisiga ahayn, dooro lambarka 4.

## XAALADDA SOCDAALKA IYO COVERME.GOV

+ ***Soo codsashada caymiska caafimaadka ma saameyn doonto xaaladdaada socdaalka, ama tan qoyskaaga.***
+ *Macaamilku maaha inuu ahaado muwaadin Maraykan ah ama qof qaatay dhalasho Maraykan si uu iskaga diiwaangeliyo qorshe caymis caafimaad oo u qalma (QHP) isagoo ka iibsaaya Marketplace. Muhaajiriinta sida sharciga ah wadanka ku jooga oo buuxiyay shuruudaha u qalmitaanka ee aasaasiga waxaa laga yaabaa inay u qalmaan caymiska caafimaadka ee Marketplace laga iibsado.*
+ *Codsadayaashani waxa kale oo laga yaabaa inay xaq u yeeshaan kaalmada maaliyadeed iyada oo loo marayo Marketplace, iyadoo ay ku xiran tahay shuruudaha xaq u yeelashada oo dheeraad ah, oo ay ku jiraan dakhliga qoyska iyo tirada qoyska.*
+ *Dukumeentiga xaaladda jinsiyadda ama socdaalka ayaa kaliya lagama maarmaan u ah dadka codsanaya caymiska, ma aha xubnaha kale ee qoyska.*
+ *Macluumadka ay macaamiishu bixiyaan ma isticmaali doonaan hay'adaha dawladda si ay u xoojiyaan sharciyada socdaalka ama siyaasadaha.*

# SIDA LA ISKU QORO CAYMISKA CAAFIMAADKA EE LOO MARO COVERME.GOV

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

## 1 Is Barbar dhig qorshayaasha oo Hel Qiyaasta Qiimaha

*CoverME.gov ayaa kuu fidinaysaa aalad lagu kala doorto oo la isbarbar dhigo oo kuu oggolaanaysa in aad si degdeg ah u hesho qiyaasta kaalmada maaliyadeed ee laga yaabo in aad u qalanto oo aad aragto kala xulashooyinka caynsanaanta iyo qiimayaasha kala duwan ee loogu talagalay qorshayaasha caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo caymiska Marketplace.*

## 2 Diyaar Noqo

*Markaad dareento inaad diyaar u tahay inaad billowdo, soo ururso dukumeentiyadan si ay kaaga caawiyaan inuu habsocodka codsigu noqodo mid fudud.*

**MACLUUMAADKA AASAASIGA AH**

Magaacda iyo taariikhaha dhalashada qof kasta oo reerkaaga ka tirsan

**CINWAANKA BOOSTADA GURIGA**

Haddii qof ka tirsan reerkaagu (kuwa aad ku darto cashuur celintaada) u leeyahay cinwaan guri oo ka duwan; waxa lagaaga bahaan yahay inaad hubiso inaad walibana qofkaas ku darto.

**LAMBARRADA SOOSHAL SEKURITIGA**
**(HADDII AY KHUSEYSO ARRINTA)**

Gali sooshal sekuuritiga qof ksta. Haddii aad kaga tagto meesha bannaan iyada oo ah waxa dhici karta in lagu weyddiisto inaad bixiso mar dambe haddii ay khusayso.

**MACLUUMAADKA DUKUMENTIGA SOCDAALKA**
**(HADDII AY KHUSEYSO ARRINTA)**

Ma yahay qof ku jira codsigiinu soo haajire sharci ah? Haddii ay sidaas tahay, waxa lagu weyddiisan doonaa inaad bixiso macluumaadka dukumeentigaaga socdaalka.

**MACLUUMAADKA DAKHLIGA**

Waxa lagaa rabaa inaad geliso dakhligaaga la qiyaasay ee 2022 ee qof kasta ee ka tirsan reekaaga, oo ay ku jiraan waxyaabo ka-jraka caadiga ah ee ka soo jeedda cashuur celintaada sannadlaha ah.

**MACLUUMAADKA XERAYNTA CASHUURTA**

Haddii aad xereyso cashuurta dakhliga federaalka, waxa dhici karta in lagu weyddiiyo heerkaaga xereynta iyo qofka ama dadka aad ku sheegatay cashuurtaada.

***FIIRO GAAR AH:** Haddii aad qorshaynayso inaad caawimo dhaqaale ka hesho CoverME.gov, waxaa lagaa rabaa inaad iswaafajiso cashuurahaaga sannad kasta.

## 3 Codso Caynsanaanta

*Markaad soo urursato macluumaadka aad ugu baahan tahay inaad u codsato, waxaad samaysan kartaa akoon oo aad buuxsan doontaa codsigaaga.*
*Haddii aad hore akoon ugu lahayd Healthcare.gov, hubi inaad isticmaasho isla macluumaadkii koontada hore ciddii lahayd marka aad ka samaynayso akoonkaaga CoverME.gov si aad u hubiso in koontadaada ay la mid tahay macluumaadka codsigaga jira.*

## 4 Kala Xulo Qorshe

*Dooro "Shop for Plans" oo ah Kala Xulo Qorshe si aad u indhindhayso qorshayaasha oo aad u xulato midka adiga iyo miisaaniyaddaada idiinku wanagsan.*

## 5 Bixi bixinta caymiska ee bisha ugu horreysa

*Si ay caynsanaantu u bilaabantoo, waa inaad siisaa bixinta bishii kasta ee caymiska ee bisha ugu horreysa shirkaddaada caymiska ka hor taariikhda dhaqangelinta heshiiska (tusaale Jan 1, 2022). CoverME.gov waxay u oggolaataa macaamiishu inay ku bixiyaan biximaha bishii kasta ee ugu horreysa onlayn ahaan iyada oo la istcimaalo ficilka"Pay Now" oo ah hadda bixi.*

## 6 WAAD Caynsantahay!

*Markaad dhammaystirto dhammaan tallaabooyinka korka ku yaal, waxaad si guul leh iskaga diiwaangelisay caynsanaanta caafimaadka adiga u maray CoverME.gov. Waxaad awoodi doontaa inaad billowdo isticmaalitaanka caynsanaantaada si aad u raadsato daryeelka aad u baahan tahay iyo inay niyaddu kuugu degto caymis leedahay!*

## WALI SU'AALO MA QABTAA? BL FIIRI MID KA MID AH ILAHAN SI AAD U HESHO TAAGEERADA AAD U BAAHAN TAHAY.

KA HEL DILLAAL (BROKER) AMA KAALIYAHA ISQORITAANKA MAINE HALKAN WWW.COVERME.GOV/LOCALHELP

SOO WAC XARUNTAYADA KAALMADA MACMIILKA TELEFOONKAN (866) 636-0355; TTY 711.



coverME.gov

AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# CAYMISKA CAAFIMAADKA CUSUB EE MAINE EE MARKETPLACE AYAA FURAN!


coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH
COVERAGE FOR MAINE
EEG INTA AAD KA
KAYDSAN KARTO
CAYNSANAANTA.



coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE
CAYMIS CAAFIMAAD OO LA AWOODI
KARO LOOGUNA TALAGALAY
MAINE, OO AY BIXINAYSO MAINE.



coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# IS BARBAR DHIG QORSHOOYINKA CAAFIMAADKA EE QIIMAHA-HOOSE

ah barta internet CoverME.gov.


coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH
COVERAGE FOR MAINE
HEL QORSHAHAAGA
CAAFIMAAD EE
QIIME-HOOSEEYA AH.
ISQOR KAMA DAMBAYN DISEMBAR 15
SI AAD U HESHO CAYNSANAAN LAGA
BILAABO JAN. 1.